

Warqada Ogeysiinta Waalidka
(Parent Notification Letter – Somali)

Taariiqda:

Gacaliye/Gacaliso Waalidka/Ilaaliyaha Sharciga _____:
(Magaca ardayga)

Sharciga Minnesota iyo Qaanunka federaaliga ah ee la yiraahdo Ubadna Dib Looma Reebayo (NCLB) wuxuu u baahan yahay in aan anaga aqoonsano haddii ardayda ku jirto dugsigena degamada yahiin kuwa Barta Luqada Ingirisiga (English Language Learners) (ELLs). Labadaan sharci waxay ELLada aqoontooda Ingirisiga xadidan tahay u dalbadaan barnaamijka tacliinta barashada luqada. Intaas waxaa sii dheer, in NCLB dalbato in aan ku siino macluumaad ku saabsan nidaamka lagu tilmaamay ubadkaada, adeegyada wax barashada iyo macluumaad kale, sida lagu soo koobay Warqada Macluumaadka ee Ubadna Dib Looma Reebayo (No Child Left Behind Fact Sheet). Nidaamka lagu tilmaamo iyo ku meeleynta ubadkaada barnaamijka tacliinta barashada luqada wuxuu ku saleysan yahay isu-geynta su'aalaha luqada guriga, aragtida maclinka, natiijadaha imtixaanka Ingirisiga iyo tilabooyin kale. Natiijadaha imtixaanka aqoonta Ingirisiga ee ubadkaaga waxaa lagu soo bandhigay hoos.

Natiijadaha Imtixaanka Ingirisiga Ubadkaada

Xirfadaha laysku Imtixaamay	Magaca Imtixaanka	Taariiqda Imtixaanka	Natiijada Ubadka	Heerka Aqoonta Ingirisiga
Ku Hadalka iyo Dhageysiga				
Aqriska				
Qoraalka				

Ubadkaada waxaa loo aqoosaday in u yahay ELL. Ubadkaada waxaa lagu meeleyn doona barnaamijka Tacliinta Labada Luqadood/ESL, sida lagu soo koobay dokumentiga ku lifaaqan. Waxaan aaminsan nahay in barnaamijkaan buuxin doono baahida tacliinta ubadkaada iyo atkeyn doono guusha u ka gaaro aqoontiisa ama aqoonteeda in u ku jiro ama ay ku jirto dugsiga.

Ubadkaada waad kala noqon kartaa barnaamijka waqti kasta adigoo warqad u diraaya dugsiga, una tilmaamaya rabitaankaada aad ubadkaada kala noqoneysid barnaamijka Tacliinta Labada Luqadood/ESL. Kaddibna ubadkaada waxaa lagu meeleyn doona barnaamijyada barashada caadiga ah kuwasoo si wanaagsan oogu hadlo luqada Ingirisiga. Fadlan si dhab ah u tixgeli waxyaabaha ka dhalan karo go'aankaada ku saabsan horumarka tacliinta mudada dheer ee ubadkaada.

Waxaan kugu soo dhaweyneynaa in aad soo booqatid dugsiga iyo in aad la kulantid shaqaalaheena si aad in badan ooga baratid faa'iidada barnaamijka iyo adeegyada kale ee laga helo dugsiga. Haddii aad qabtid su'aalo, fadlan dugsiga ka wac _____.

Mahadsanid,

Maamulaha Dugsiga